**4. Shirkadu waa iney leedahay Qalabkii Gaadiidka lagu Hubinayey.**

**5. Shirkadu waa iney leedahay ugu yaraan shan xarumood oo ku yaala Magaalada Mugdisho.**

Waraaqaha Qandaraaska waxaad ku keeni kartaan Gacan Xarunta Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawda oo ku taala Degmada Shingaani aaga Bankiga Dhexe ee Gobolka Banadir Mogadishu-Somalia ama Email: khadar.aden@Motca.gov.so CC: dproc@motca.gov.so dg@motca.gov.so adigoo ku cadaynaya Ujeedada qandaraaska 9:00 Subaxnimo ilaa 3:00 Galabnimo Taariikhdu markey Tahay 11-January -2022 ilaa 31-January-2022, dib u dhicida Waraaqaha qandaraaska Tijaabda baabuurta lama aqbali doono haduu dhaafo wakhtigii loo asteeyey. Wixii faahfaahin dheeraad ah kala xiriir Tell: +252-61-7076555 or +252-61-5561156

***Mahadsanidiin,***

KHADAR C/LAHI AADAN
AGAASIMAHA MAAMULKA & MAALIYADDA AHNA K/S AGAASIMAHA GUUD
WASAARADDA GAADIIDKA & DUULISTA HAWADA

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
Xukuumaddda Federaalka
Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada
Xafiiska Agaasimaha Guud

جمهورية الصومال
الحكومة الفيدرالية
وزارة النقل والطيرانالمدني
مكتب المدير العام

SOMALI FEDERAL REPUBLIC
The Ministry of Transport and Civil Aviation
Office of The Director General

**Ref: X/AGG/WGDH/ 15 /2022**

**January 9th, 2022**

**Ku: Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka & Dalxiiska XFS** **Muqdisho**
**Og: Agaasimaha Waaxda Gaadiidka Rayidka PRA** **Muqdisho**
**Og: Agaasimaha Waaxda Maamulka & Maaliyadda** **Muqdisho**
**Og: Wasiir k/xigeenka Wasaaradda G.D.H** **Muqdisho**
**Og: Wasiiru Dowlaha Wasaaradda G.D.H** **Muqdisho**
**Og: Wasiirka Wasaaradda G.D.H** **Muqdisho**
**Muqdisho**

**Ujeeddo: <u>Xayeeysiin Qandaraaska Tijaabada Badqabka Gaadiidka Dhulka ee (KALAAWITADA)</u>**

Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada ee Dowlada Federalka Somalia, waxay soo bandhigeysaa tartan ku saabsan Tijaabada badqabka Gaadiidka dhulka ee (Kalaawitada) oo ah mid u furan shirkadaha Somaaliyeed ee soo buuxin kara shaqada iyo shuradaha looga baahanyahay qandaraaskan, shirkadaha waxay guud ahaan baarayaan ciladaha baabuurta meelkasta, waxayna si aqoon ku dheehantahay ay u sheegayaan baabuur walba meesha u layahay iyo dhamaan badqabka baabuurta oo isugu jirta Babuurta Waawayn, kuwa Xamuulka qaada iyo birta Culus.

Shirkadaha u tartamaya qandaraaskan waa iney la yimaadan qodobadan soo socda.

1. **Profile ka Shirkadda**
2. **Shatiga Ganacsiga**
3. **Diwaan Galinta Gobolka Banaadir**
4. **Diwaan Galinta Wasaaradda Gaadidka**
5. **Warqada ama Documents ka Canshuur Bixinta**
6. **Warqada Danbi la aanta**

Sidoo kale shirkadaha u tartamaya Qandaraaska tijaabada badqabka Baabuurta (Kalaawitada) waa iney qaban karaan shagada ku saabsan tijaabada iyo Hubinta baabuurta sida.

1. **Shirkadu waa iney leedahay Maaliyada Awoodeed (Financial Position)**
2. **Shikadu waa iney leedahay khibrad farsamo o dhinaca Gaadiidka Dhulka ah.**
3. **Shirkadu waa iney leedahay Shaqaale xirfad u leh Gaadiidka.**